

NUXURKA OO KOOBAN

Soomaalida Helsinki

At Home in Europe Project

21 Nofeembar 2013

Daraasadda **Soomaalida Helsinki** waxay qayb ka tahay aqoonbaaris balaaran oo ay fulisey hay'adda At Home in Europe oo ka tirsan hay'adda Open Society Foundations. Daraasadda waxaa laga fuliyey toddoba magaalo oo Yurub ku yaalla oo ay Soomaalida ugu badani ku nooshahay. Cilmibaaristani waxay baaraysey xaqiiqada dhabta ah oo ka jirta dadka asalkoodu Soomaali ka soo jeedo ee Amsterdam, Copenhagen, Helsinki, Malmo, Leicester, London iyo Oslo ku nool. Dhanka Helsinki aqoonbaarista waxaa maareeyey Waaxda Aqoonbaarista Bulshada, Jaamacadda Helsinki.

Warbixintan waxay fiiro gaar ah siinaysaa waaya-aragnimada Soomaalida Helsinki ku nool, iyadoo shan qaybood ee siyaasadda belediyadda iyo dulucda ballaadhan ee aqoonsiga, ka-mid-ahaanshaha iyo isla-falgalka diiradda saaraysa. Iyadoo loo marayo hannaanno aqoonbaaris tayaysan, ay ka mid tahay waraysiyo lala yeeshey dhinacyada ugu waaweyn ee heer magaalo iyo mid qaran ee hawsha daneeynaya iyo Soomaalida deggan magaaladda oo si koox-koox ah wada xaajood loola yeeshey (*focus groups*), taasoo la fuliyey intii u dhexeeysey billowgii Disembar 2012 ilaa iyo dhammaadkii Febraayo 2013, waxay warbixintan Open Society Foundations isuddumaysaa aragtiyo kala dudduwan, waxayna bixinaysaa soo jeedin talooyin waxtar leh oo ku saabsan sidii loo sii wanaajin lahaa iskumid-ahaanshaha iyo iskummideeynta bulshadan kala geddisan ee ku nool magaladan Cirifka Waqooyiga ku taalla.

Inkastoo gebi ahaan kolka laysku soo duubo tiradooda ay weligeed aad u yareeyd, misana imaanshaha magangelyaddoonnada Soomaalida ee Finlaandiya horraantii 1990-meeyadii waxay ahayd dhacdo ahmiyad leh. Waxaa loogu magacdaray in ay tahay “Saskii Soomaalida”. Waxay ahayd waaya-aragnimadii Finlaandiya u horreesey in ay qaabbisho kooxo tiro badan oo qaxooti ah.

Dadweynaha

Shacabka Finlaandiya deggan waxaa loo nisbeeyaa in uu yahay isirwadaag. In ka yar boqolkiiba shan ayaa lagu tiriyaa in asalkoodu shisheeye ka soo jeedo. Koytoyda intooda badan waxay ku urursan yihiin magaalammadaxda, Helsinki, iyo nawaaxigeeda. Dadka asalkoodu Soomaali ka soo jeedo waa kooxda saddexaad ee ugu tirada badan dadyowga koytoyda ah ee Finlaandiya ku nool. Dabayaaqadii 2012kii waxaa tiradooda lagu qiyaasay ilaa iyo 14,672 qofood.

Xaaladda siyaasadeed

Mas'uuliyadaha isdhexgelinta koytoyda Finlaandiya ku nool iyo dadka dalka degan waxay u kala qaybsan yihiin mid heer qaran ah iyo mid dawladaha hoose ah. Degmada Helsinki iyo qaybteeda koytoyda waxay horumarisay siyaasadda ku aaddan degmada, iyadoo fiiro gaar ah siisey iskummideeynta iyo wadajirka, guriyeeynta, shaqaaleeynta iyo waxbarashosiinta.

Aqoonsiga iyo ka-mid-ahaanshaha

Xog aruurin wadareedyadii ay Open Society Foundations samaysey waxaa ka muuqatay isku raacid buuxda oo ku saabsan in ay jiraan diidmo qayaxan oo ka imanaysa bulshoweynta Finladeeska ah oo ku aaddan Soomaalida Finlaandiya deggan. Taasi waxay sii kordhisaa dareenka kala duwanaanta joogtada ah iyo ka soocnaanta bulshoweynta. Kaqaybgalayaasha daraasadii ay fuleysay hay'adda 'At Home in Europe' waxay caddeeyeen, tiro Soomaali kale oo soo korodha in ay caawinayso dhisidda dareenka ka-mid-ahaanshaha iyo jaaliyadnimada. Waxay tilmaameen isla-falgallo kala dudduwan in ay la yeesheen Finlaandiyada, inta badan ahaa kuwo qaddarin mudan hayeeshee qabow, kuwaasoo ay ka mid ahaayeen guulo yaryar oo fekredo-curin ah oo ku aaddan horumarinta beesha taasoo ka caawintay sidii loo dhisi lahaa xiriir joogto ah oo kooxaha ka dhexeeya oo waxtar leh.

Midabtakoor iyo cadaadis

Xogwaraysiyo 2009kii EU-MIDIS laga heley, waa Wakaaladda Gundhigga Xuquuqda Dadka Laga-tiro-badanyahay ee Midowga Yurub iyo Daraasadda Midatakoorka, waxay Soomaalida Finlaandiya ku nool ka mid yihiin koytoyda iyo kooxaha jinsiyadaha laga tiro badanyahay kuwa ugu midabtakoor-la-kulan badan. Waxaa mid ka mid ah daraasad qaran laga ogaaday in Soomaalida Finlaandiya ku nool soo tebiyeen in waddada, dukaammada, booliska iyo goobo kaleba ay kula kulmaan cadaadis iyo midabtakoor. Wuxuu balambalkan kordhinayaa, waa siday ka qaybgalayaasha waraaysi kooxeedyadu wariyeene, dareenka go'doonka iyo amniddarrada.

Waxbarashada

Kala duwanaanta iskuullada waa mid sii kordhaysa, Soomaaliduna waxay ka mid tahay kooxaha koytoyda kuwa ugu badan, gaar ahaan marxaladda iskuullada ka horreeya iyo waxbarashada dugsiyada hoose. Hayeeshee, intaas wixii ka dambeeya tirada ardayda si xooggan ayay hoos ugu dhacdaa, iyadoo waliba taa ay sii weheliso caddadka afka Soomaaliga ku hadla ee tacliinta sare u gudba uu aad u yaraado kolka loo barbardhigo kooxaha koytoyda kale. *Dadkaii ka qayb galay dood wadareedyada* ayaa arrintan fekred ka bixiyey, halkaasoo ay dhanka afka welwel gaar ah ka muujiyeen. Carruurta waalidkood afka Soomaaliga ku hadlo baa laga yaabaa in la fadhiisiyo, fasalka loogu talo galay dadka aan sida fiican afka Finnishka u aqoon ee loo yaqaan S2 (Suomi toisena kielenä-S2), iyadoon loo aabayeelayn awooddooda af

barasho. Kooxihii waraysigan kaqaybgalay ayaa sidoo kale wariyey in takoor iyo kalasoo uu iskuullada ka jiro.

Shaqaaleeynta

Kaqaybgalayaasha waraysi kooxeedyada ayaa welwelkooda ugu weyn ka muujiyey dhibaatooyinka ka jira qaybta shaqaaleeynta. Arrinta sida buuxda laysugu raacsanyahay waxay tahay in takoor ku yahay carqalad weyn ee saameeyn ku leh shaqo helidda Soomaalida Finlaandiya ku nool, sidaana waxaa ku taageersan baarritaan daraasado madaxbannaan. Dumarku waxay la kulmaan dhibaatooyin gaar ah, barnaamijyada tababbarka ay helaanna maaha mid inta badan mirodhal leh. In ruuxu awoodi kariwaayo in uu shaqo helo waxaa lagu tilmaamay in ay caqabad weyn ku tahay ka-mid-ahaanshaha bulshada Finlaandiya. Haddii aan ruuxu karti buuxda u lahayn aqoonta luuqadda waxay xayiraad ku tahay shaqo heliddiisa. Bal isagoo buuxiyey xirfaddii aqoonta luuqadda looga baahnaa baa misana aanay ku fillayn in uu helo shaqadii ku habboonayd.

Guriyeeynta

Caadada isku dhafidda dadka kala duwan ee siyaasadda guriyeeynta Helsinki waxay dhalisay natiijooyin wacan oo la xiriira kalasoo-cidda koytoyda loo geeysto oo yaraatay. Hase ahaatee, siduu aagga Helsinki u noqonayay kob dadka kala duwan ku soo kordha, ayaa sidoo kale waxaa ku soo badanayay midabtakoorka xaafadaha dhexdooda. Istaraatiijiyadaha lagu taageerayo guriyeeynta isku dhafan waxay ahaayeen kuwa ilaa iyo heer lagu guulaystay. Iyagoo weli uurka ka ogsoon cadaadiska cunsuriyadeed ama cabsigelineed ee lagu hayo, ayaa koytoy badan dareensantahay in ay ku nabadgelyo qabaan aagga ay ku badan yihiin. Kaqaybgalayaasha waraysi kooxeedyadu waxay wariyeen fekredo wejiyo kala dudduwan leh oo la xiriira xaaladda guriyeeynta. Qaarkood xaaladda guriyeeynta ayay ku qanacsan yihiin oo waxaa ku jira dareen mujtamaceed, qaarna tayada guriyeeynta iyo helloonaanta adeegga, qaar kalena waxay muujiyeen walbahaar ku saabsan cunsuriyadda iyo go'doonka.

Caafimaadka iyo difaaca bulshada

In kastoo warbixinno guud ay sheegayaan in saansaan caafimaad-darro ka jirto jaaliyadaha Somaaliyeed ee Finlaandiya ku dhaqan, hayeeshee aqoonbaarisyo badan waxay tilmaamayaan in tayada noloshooda ay ku qanacsan yihiin. Kala duwanaansho ayaa jirta oo Soomaalida iyo Finlaandida u dhexeeya qaabkii ay daweynta u wejihi lahaayeen. Sidoo kale waxaa jira dhibaatooyin isgaadhsiineed ee luuqadda ah ee xagga shaqaalaha caafimaadka. Guud ahaanse kaqaybgalayaasha waraysi kooxdyadu waxay qabaan in tayada xannaanada caafimaadka uu wanaagsan yahay. Soomaalida isticmaaliddooda adeegyada caafimaadka maskaxda waa mid aad u hooseeya, in kastoo weli ay jiraan tiro fara badan oo xanuun-maskaxeed qaba.

Ilaalada iyo amniga

Doodihii dhexmaray kaqaybgalayaasha waraysi kooxeedyada , guud ahaan dhanka amniga aagga Helsinki waa ku kala qaybsanaayeen. In kastoo qaarkood ay amaaneen amniga iyo jawiga ilaalada xaafadaha oo aad u wacan, qaar kalese waxay carrabbaabeen in suuradeeynta cunsuriyadda ay tahay dhibaato jirta. Haweenkuna waxay sheegeen in waddooyinka maristooda ay dhibaato cadaadis leh ka haysato. Aqoonbaarisyo ayaa muujinaya in Soomaalidu jariimadaha soo gaadha ay dhif iyo naadir ku war geliyaan hay'addaha ku shaqada leh. Doodihii dhexmaray kooxihii *qayb galay wareysi kooxeedyada* ayaa lagu soo hadal qaaday in xaalado kiisas farasaar ah ay jiraan oo dhacay oo booliska tallaabadii ku habbooneed aanu ka qaadinnin.

Kaqaybqaadasho iyo muwaaddinnimo

Qiyaastii ilaa iyo 40 boqolkiiba waxay Soomaalida Finlaandiya ku nool haysataa dhalasho. Sida kaqaybgale waraysi kooxeedyada uu sheegey, "Dhalashada oo la qaataa waxba inta badan xaaladda ka beddeli mayso, waxaa la eegaa uun waa meesha dir ahaan qofku ka soo jeedo", halkii ay ahayd in la dhawro dareenka ah iskummideeynta bulshada. Siyaalaha dadka koytoyda ah loogu dhiiri gelinkaro inay si ilbaxnimo leh uga qaybqaataan arimaha bulshada waxaa ka mid ah in laga qaybgeliyo guddiyada xaafadda (deegaanka) iyo ururrada Soomaalida. Sida doodda wareysi kooxeedyada ku cad, guusha waxyaabo cusuboo la curiyo waxay inta badan ku xirantahay ilaa iyo heerka jaaliyadaha Soomaalida ay doonayaan in ay ka qaybqaataan. Waxaa jira ururro badan oo Soomaalida Finlaandiya ku nool leedahay, kuwaasoo intooda badan ka faa'idi lahaa taageerada awood dhisidda iyo dadaalka sidii dan qudha loogu wada mideeyn lahaa. Musharraxyo Soomaali ah ayaa ka qaybqaatay doorashooyinkii dawladda hoose. Noofembar 2012kii, ayaa haweeney Soomaali ah oo dawladda hoose ee Helsinki muddo dheer xubin ka ahayd dib loogu soo doortay xubinnimada golaha degmada Helsinki.

Doorka warbaahinta

Weli waa mid xaddidan qaabka ay warfaafintu u baahiso wararka jaalliyadaha koytoyda. Aqoonbaarisyo ayaa walaac ka muujiyey u xaglinta warbaahinta in masalooyinka iyo sawirrada khaldan ay Soomaalida ka bixiso taasna waxay caddil ku noqonaysaa isdhexgalka. Cilmibaaris ayaa ku tilmaantay warbaahinta ugu doorroon in mowduucyo diidmo ah diiradda u saaraan oo koytoyda la dabagalaan oo daabacaan, sida jariimadda iyo khilaafka. Waxaa iyana jirta in ayan jirin codadka koytoyda oo ka dhex muuqda warbaahinta ugu doorroon.

Talo-soo-jeedin

Iyagoo ka mid ah kooxaha koytoyda kuwii ugu badnaa ee Finlaandiya soo gala, Soomaalidu dhibaatooyin badan ayaa isdhexgalka kala soo deristey. Xilligaas ama ha noqoto dawladda dhexe ama midda hoose waxay ku shaqeeyeen ama ku wejiheen qaabab kala dudduwan ee siyaasadeed oo caawinaysa sidii koytoyda u heli lahaayeen waddadoodii ay bulshada Finlaandiya kaga mid noqon lahaayeen. Ilaa iyo imminka waxaa jira xayiraado hor yaalla, gaar ahaan shaqooyinka iyo qaybaha waxbarashada sidii loo heli lahaa. ku darsoo, waxaa intaa sii weheliya midabtakoor iyo cadaadis oo lagu tilmaamo in ay caqabado waaweyn ku yihiin geedisocodka isdhexgalka. Kooxda kaqaybgalayaasha waraysi kooxeedyada dhexdooda si buuxda ayay ku kala geddisnaayeen sawirrada nololmaalmeedka Helsinki, qaar waxay ku ammaanayaan buuq yarida, amniga bey'adda, qaar kalena waxay la harjadayaan go'doon iyo shaqo la'aan. Waxaa xilligan jira fekredo tijaabo dhowr ah oo lagu hormarinayo iskummeleeynta, lagana yaabee caddad ka sii tiro badan in ay ka qaybqaataan. In kastoo qaybaha bulshada rayidka ah ay firfircoon yihiin, misana si xooggan ayay u kala qaybqaybsan yihiin. Laga yaabee in ay caawin lahayd haddii la heli lahaa dadaal intaa ka sii badan oo si mideeysan u wejihi kara xallinta su'aalaha qaarkood ee luraya guud ahaan jaalliyadaha Soomaalida. Way muuqdaan kolka la eego kala duwanaanta waaya-aragnimada dhanka labka iyo dheddigga iyo jiilka, hayeeshee u baahan in la sii darso. Gaar ahaan, waa in jiilka labaad ee Soomaalida Finlaandida ah fiiri gaar ah la siiyo si looga dhabeeyo in ay dareemi karaan in ay Degmada Helsinki ka mid yihiin iyo in ay haystaan fursadaha u suurtaggelin kara in nolosha ay ku guulaysan karaan sida muwaaddin kastoo kale oo reer Finlaandiya ah.

1. Waxaa dawladda Finlaandiya, dawladda hoose ee Helsinki iyo wakaaladaha haqabtirayaasha qaranka looga baahanyahay in ay sare u qaadaan qodobka wacyiggelinta ka-mid-ahaanshaha, isbeddelka muuqaalka sinjiga bulshada Finlaandida iyo aqoonsiyo tiro badan oo soo shaacbaxaya. Tusaale ahaan, Degmada Helsinki waxay qabanqaabin kartaa in ay isugu yeerto koox shaqo oo ka kala socda shirkadaha dawladda iyo kuwa lahaanshaha gaar ahaaneed, kuwaasoo ka shaqeeya daabacaadda iyo soosaaridda, website-yo, xayaysiin iyo maaddooyin muuqaalka ah oo wax u tara dawladda hoose iyo hay'adaha guud oo kale. Dabadeed kooxdu waa in ay naqtiin ku sameeysaa maaddooyinka haatan taagan iskuna afgartaan mabda' iyo hab lagu wejiho iyo sida si qumman loogu caddeeyn karo kala duwanaanta dadweynaha Helsinki ku nool iyo in sare loo qaado suuradda iyo sumcadda oggolaansho jaalliyadaha laga tiro badan yahay.
2. Doorarka waxbarashada iyo machadyada tacliinta waa muhim nololeed xagga horumarinta iyo fursadiinta dhammaan dadkoo dhan, si taasi u fusho waxaa shardi mudan xubno bulsho oo sinnaan leh kuna shaqeeya xasilloonnida iyo wadajirka bulshada. Bayaanno xaddidan oo la shaaciyay ayaa tilmaamaya in Soomaalidu kaalinteeda waxbarasho ay aad u hooseeyso gaar ahaan dhanka tacliinta sare. Waa in ay Wasaaradda Waxbarashada, Guddoonka Waxbarashada Qaranka iyo Degmada Helsinki darsaan siiqadda iyo nidaamka laga yaabo in ay sabab u yihiin iyo in laga shaqeeyo xallin keli ahaaneed oo ku habboon dhammaan kooxaha ay tirada dhallinyaradooda waxbarashada dugsiyada sare dhigata ay hooseeyso, sida Soomaalida, si ay u gaadhaan waxbarashada dugsiyada sare oo u helaan tababbar xirfadeed ama aqoon adag oo akadeemiyadeed taas oo u oggolaan karta in ay u sii gudbaan waxbarashada sare sida jaamacadaha. Hanuuninta waxbarashada iyo talosiinta ardayda iyo xubnaha waalidyada waa in la bilaabaa waqti in badan ka horreeya fasalka gaad.
3. Waa in xukuumadda Finlaandiya siisaa fiiro gaar ah kooxaha koytoyda, sida Soomaalida ee xaaladda qalafsan ka soo wejihay suuqa shaqada, goorta ay wax qorsheeynayaan oo istaraatiijiyadaha fulinayaan. Imminka Qaybaha Badbaadada iyo Caafimaadka Meheradda ee Maammulka Hay'adda Dawlad Goboleedka ayaa kontoroosha sidii loo waafajin lahaa Qaanuunka Takoor La'aanta dhanka arrimaha shaqoqoridda. Taladu waxaa weeye in hawshan loo wareejiyo hay'ad kale, taas oo awoodi karta in ay gacansaar soke oo wada shaqeeyn ah la yeelato jaalliyadaha koytoyda, gaar ahaan jaalliyadaha isirfaquuqa wax badan kala kulmay suuqa shaqada, sida Soomaalida.

NAGALA SOO XIRIIR:

Si aad u heshid faahfaahin dheeri ah oo ku saabsan daraasaddan iyo Mashruuca At Home in Europe fadlan la xiriir:

Klaus Dik Nielsen, Advocacy Officer, At Home in Europe Project
Open Society Initiative for Europe
Work: +44 (0) 207 031 1714
Mobile: +44 (0) 791 769 5286
klausdik.nielsen@opensocietyfoundations.org

OPEN SOCIETY FOUNDATIONS

THE OPEN SOCIETY FOUNDATIONS WORK TO BUILD VIBRANT AND TOLERANT DEMOCRACIES WHOSE GOVERNMENTS ARE ACCOUNTABLE TO THEIR CITIZENS. WORKING WITH LOCAL COMMUNITIES IN MORE THAN 70 COUNTRIES, THE OPEN SOCIETY FOUNDATIONS SUPPORT JUSTICE AND HUMAN RIGHTS, FREEDOM OF EXPRESSION, AND ACCESS TO PUBLIC HEALTH AND EDUCATION.

